

Dhabada Kuuliyada iyo Mihnada:


Dugsiga Sare Kadib

Miyaad weligaa is waydiisay ikhtiyaarada uu heli karo ardaygaagu dugsiga sare kadib?

Yoolka Utah waxaa weeye in dhamaan ardayda ka qalin jabinaysa dugsiga sare ay diyaar u noqoto kuuliyada, mihnada iyo nolosha, si ay u beegsadaan mustaqbalka ay doortaan. Boqolkiiba shan iyo sagaashan shaqooyinka cusub ee ka banaanaaday Great Recession la abuuray laga soo bilaabo Burburkii Dhaqaale ee Weynaa ee (2008) waxay u baahan yihiin waxbarasho kuuliyadeed, laakiin kala badh shacabka Utah ayaa haysta dhigrii kuuliyadeed ama shahaado tayo sareeya. "Badanaa ardaydu waa inay helaan dhibco dugsiga sare kadib ah...si ay u helaan mushahar qoysku biili kara dhaqaalaha maanta."

Waxa aad siisaa mudo yar oo aad ku eegto dhabada dugsiga sare kadib.

Iyada oo ay ku xidhan tahay qorshaha mihnada ardayga, kuuliyada qaar ayaa kaaga haboonaan kara kuwo kale. Kuuliyado badan oo Utah ah waxaa ka socda is duwaan gelinta, taas oo ka dhigan in waxa aad u baahan tahay uu yahay dhiblooma dugsiga sare ah si aad ugu biirto (maaha sharci GPA ama ACT). Hoos waxaa ku yaal liiska jaamacadaha, kuuliyada iyo kuuliyada farsamada gacmaha ee Utah. **Waxa aad kala sheekeysataa macalimiinta iyo lataliyayaasha dugsiga wixii ku saabsan ikhtiyaarada.**

| Kuuliyada Farsamada Utah | Kuuliyada Bulshada Utah |
|--|--|
| <p>WAA MAXAY? Kuuliyada farsamada gacantu waxay bixiyaa barnaamijyo shahaado (oo uu la socdo dhibco xasiloon*) oo loogu talo geley ardayda u qalanta inay ka shaqeeyaan shaqooyin kala duwan. Kuuliyadaha farsamo waxa ay u sahlayaan ardayda inay si dhakhso ah u bilaabaan shaqo leh mushahar lagu noolaan karo xirfadaha ama ganacsiyada dalabka badan. Kuuliyada farsamo waxa ay noqon kartaa machad madax banaan ama waxa uu qayb kamid ah noqon karaa kuuliyada wayn ee bulshada ama jaamacada.</p> <p>Barnaamijyadan shahaadada waxaa la heli karaa inta lagu jiro ama kadib dugsiga sare.</p> | <p>WAA MAXAY? Kuuliyada bulshadu waxay bixiyaan shahaadooyin, khibrad korodhsi* iyo dhigrii laba sano ah oo qiimo jaban marka loo eego badanaa jaamacadaha. Waxay yeelan karaan cabir fasal oo yar sidoo kale. Kuuliyada bulshadu waxay bixisaa barnaamijyo tobobar shaqo oo ardayda si dhakhso ah ugu dari kara shaqaalaha, waxbarashada guud iyo duruusta waawayn oo hadhaw loo wareejin karo jaamacada laga qaato baajolaar dhigrii.</p> |
| <p>Bridgerland Technical College btech.edu 435-753-6780</p> | <p>Ensign College ensign.edu 801-524-8100</p> |
| <p>Dixie Technical College dixietech.edu 435-674-8400</p> | <p>Salt Lake Community College slcc.edu 801-957-3391</p> |
| <p>Ogden-Weber Technical College otech.edu 801-627-8300</p> | <p>Snow College snow.edu 435-283-7000</p> |
| <p>Tooele Technical College tooeletech.edu 435-248-1800</p> |  |
| <p>Mountainland Technical College mtec.edu 801-753-6282</p> | |
| <p>Davis Technical College davistech.edu 801-593-2500</p> | |
| <p>Southwest Technical College stech.edu 435-586-2899</p> | |
| <p>Uintah Basin Technical College ubtech.edu 435-722-6900</p> | |

* Khirbad korodhsigu waxa uu dhisaa wax ku oolnimo mudo gaaban lagu helo, duruus qiimo jaban/shahaado ka caawin karta ardayda inay hormariyaan mihnadooda (meel ay uga duulaan waxbarasho dheeraad ah).

| Jaamacada Deegaanka Utah | Jaamacada Daraasada Utah |
|--|---|
| WAA MAXAY? Jaamacadaha deegaanku waxay bixiyaan dhigrii laba sano ah, baajolaar dhigrii iyo maaster. Jaamacadaha qaar deegaanku waxay bixiyaan mihnado iyo barnaamijyo waxbarashadda farsamada gacanta sida shahaadooyin iyo dhigrii laba sano ah. | WAA MAXAY? Jaamacadaha gaarka ah iyo gobolku ee daraasadu waxay sameeyaan daraasadu oo waxay soo saaraan arday maasterka. Waxay bixiyaan barnaamijyo/dhigriiyo lamid ah kuuliyada kale badankooda; yoolkooda ugu danbeeyaa waxaa weeye in la eego shaqooyinka gaarka ah ee daraasada oo ay bixiyaan dhigrii maaster ah. |
| Dixie State University dixie.edu 435-652-7500 | Brigham Young University byu.edu 801-422-4636 |
| Southern Utah University suu.edu 435-586-7700 | University of Utah utah.edu 801-581-7200 |
| Utah Valley University uvu.edu 801-863-8000 | Utah State University usu.edu 435-797-1000 |
| Weber State University weber.edu 801-626-6000 | Westminster College westminstercollege.edu 801-832-2200 |

¹ Nidaamka Utah ee Waxbarashada Sare. (2019). Nidaamka Utah ee Waxbarashada Sare 2018 warbixintiisa sanadkii. Lagala soo baxay https://ushe.edu/wp-content/uploads/2019/02/2018_USHE-Annual-Report.pdf

² Bromberg, M. & Theokas, C. (2016, Maarso 31). Qaadashada duruusta qalinjabinta: Natiijada warbixinta ee ka qalinjabinta dugsiga sare. Laga soo baxay Maarso 24, 2021, <https://eric.ed.gov/?id=ED566663>

Sharaxa Noocyada Shahaadooyinka/Dhigriiyada

Qoraal Furan: Badanaa Kuuliyadaha Utah ah waxaa ka socda is duwaan gelinta, taas ka dhigan in waxa aad u baahan tahay uu yahay dhiblooma dugsiga sare ah si aad ugu biirto.

Shahaadada/Dhigriiga Farsamada Gacanta:

Barnaamijyada kuuliyada farsamada/dugsiga ganacsiga waxa uu bixiyaa xirfado la taaban karo, oo gaar ah si loo bilaabo mihnada, marka la dhameeyo barnaamijka ama shahaadada loo baahan yahay. Ardaydu waxay bilaabi kartaa nidaamkan iyaga oo ku jira dugsiga sare.

Digrii Laba Sano Ah:

Digriiga labada sano ah waxaa weeye digriiga sayska ah ee ka caawin kara ardayda inay gaadhaan guul waxbarasho iyo yoolashooda mihnadeed mudo yar gudaheed oo yar inta ay ku qaadanayso inay helaan baajolaar dhigrii. Waxaa loogu talo geley ardayda inuu siiyo farsamo aas aasiga ah iyo aqoon waxbarasho iyo xirfad ay wareejin karaan oo ay ugu baahan yihiin inay ku shaqeeyaan ama inay ku hormariyaan mihnadooda. Dhibcaha la wareejin karo ee barnaamijka labada sano dhigriiga ah waxaa lagu xisaabiyaa waxbarashadda guud, asalka, iyo duruusta gaarka ah ee dhigriiga afarta sano.

Dhigriiga Baajolaarka:

Dhigriiga baajolaarka waxaa weeye shahaado dhigrii ah halkaas oo ardaydu ay ku bartaan duruus gaar ah, sida dhaqaalaha, bayloojiga, ama xidhiidhka. Dhigriigan waxa uu siinayaa ardayda xirfado iyo aqoonta ay u baahan yihiin si ay mihnado kala duwan ugu shaqaystaan. Arday badan ayaa gala barnaamijyada kuuliyada marka ay sidaa uga soo baxaan dugsiga sare. Waxay caadiyan qaadataa afar sano oo laba gelin ah in la dhamaystirtaa (oo leh 120 dhibco seemister ama ilaa 40 kuuliyadood duruus ah).

Maaster Dhigrii:

Maaster dhigrii waxaa weeye waxbarashada maasterta ee shakhsiyaadka haysta baajolar dhigriiga. Waxa uu caadiyan diirada saaraa waxbarashada qaar ama aag nidaamka waxbarasho ah.

Dhigriiga Dhoktoreetka: Dhigriiga dhoktoreetku waxaa weeye dhigrii sare ama xirfad sare ah oo muujinaya inaad gaadhay heerka ugu sareeya ee mawduuc gaar ah. Waxaa weeye dhigriiga ugu sareeya ee macquulka ah ee waxbarashadaas.

(Sii socota)

Noocyada Dhibcaha/Dhigriiga Lagu Bixiyo Machad Kasta

| Magaca Kuuliyada Utah | Qoraal Furan | Shahaadooyin | Digrii Laba Sano Ah | Dhigriiga Baajolaarka | Maaster Dhigrii | Dhoktareet (PhD) |
|--|--------------|--------------|---------------------|-----------------------|-----------------|------------------|
| Bridgerland Technology College | ■ | ■ | | | | |
| Brigham Young University (Gaar) | | | | ■ | ■ | ■ |
| Davis Technical College | ■ | ■ | | | | |
| Dixie State University | ■ | ■ | ■ | ■ | ■ | |
| Dixie Technical College | ■ | ■ | | | | |
| Ensign Business College (Gaar) | | ■ | ■ | | | |
| Mountainland Technical College | ■ | ■ | | | | |
| Ogden Technical College | ■ | ■ | | | | |
| Salt Lake Community College | ■ | ■ | ■ | | | |
| Snow College** | ■ | ■ | ■ | ■ | | |
| Southern Utah University | ■ | ■ | ■ | ■ | ■ | |
| Southwest Technical College | ■ | ■ | | | | |
| Tooele Technical College | ■ | ■ | | | | |
| Uintah Basin Technical College | ■ | ■ | | | | |
| University of Utah | | | | ■ | ■ | ■ |
| Utah State University—Logan | | ■ | ■ | ■ | ■ | ■ |
| Utah State University—Xarumaha Deegaanka | ■ | ■ | ■ | ■ | ■ | ■ |
| Utah Valley University | ■ | ■ | ■ | ■ | ■ | |
| Weber State University* | ■ | ■ | ■ | ■ | ■ | ■ |
| Westminster College *(Gaar) | | | | ■ | ■ | ■ |

* Dhoktareetka Kaaliyaha Caafimaadka waxaa weeye dariska kaliya ee dhoktareetka ah ee lagu bixiyo Weber State University iyo Westminster College.

** Snow College waxay bixisaa laba Baajolaar dhigrii: Baajolaar Dhigrii Muusiga ah oo diirada lagu saaro Ganacsiga Muusiga iyo Baajolaar Dhigrii Injineerinka ah.

Tilmaamaha Kuuliyada Utah waxaa weeye khayraad wanaagsan oo u diyaarinaya ardayda kuuliyada oo badanaa dhinacyada waawayn sheega—qorshaynta, bixinta iyo doorashada kuuliyada kugu haboon (waxaa daabacay Ururka Waxbarashada Sare ee Utah—USHE).

https://ushe.edu/wp-content/uploads/pdf/k-12/college_guide-english.pdf